



## **Matthew Bacon-Brene oo Barre ka ah Iskuulka Mt. Tabor ayaa loo magaacabay Macalinka Sanadka 2018 ee Gobolka Oregon**

Matthew Bacon-Brenes oo ah barre barnaajimka labada luqadood ee Jabaanka Dugsiga Mt. Tabor ayaa loo aqoonsaday Macalinka Sanadka 2018 ee Gobolka Oregon.

Maalintii Tallaadii, ayaa Ku-Xigeenka Madaxa Waxbarashada Dadweynaha Gobolka Oregon Saalim Nuur soo booqday iskuulka Mt. Tabor si uu u guddoonsiiyo shahaado sharafta ugu sarreyso gobolka ee waxbarista macallin Bacon-Brenes. Saalim wuxuu xusay in habka hal-abuurnimo ee macallin Bacon-Brenes, xiisaha uu u qabo inuu noqdo qof qiime sare leh, iyo ka go'naanshaha siduu ugu dadaali lahaa inay ardeydiisu ay noqdaan kuwa guuleysta.

Labaatankii Sanno (20) ee la soo dhaafay macallin Bacon-Brenes wuxuu ku reebay raad u weyn barnaamijka Jabaanka K-12 ee labada luqadood Dugsiyada Dadweynaha Portland. Taageeradiisii barnaamijku waxay noqotay tan xoojisay in lagu guuleysto, iyada oo uu arday fara badan noloshoodii wax badan ka bedelay. Macallin Bacon-Brenes wuxuu sanadkii hal mar ka qeybqaataa muddo labo todobaad ah sidii uu ugu fudeydin lahaa socdaal ay ardeyda fasalada 8aad ku tagaan Jabaan socdaalkaasi oo ah Cilmi Baadhis, iyaga oo cilmi baadhis ku sameyanaya firadaha ku xeeran dhaqanka Jabaanka, taariikhda iyo cilmiga bulshada.

“Macallin Matt hoggaaminta waxbarista, anshaxiisa shaqo ee aan isbedelin, iyo isaga oo si qoto dheer u aaminsan in dhammaan loo addeego caruurta ayaa ahayd tiirarka guusha ee iskuulka Mt. Tabor”, sidaas waxaa tiri Jefeiner Patterson, oo ah aggaasime sare Franklin K-8 Dugsiyada Dadweynaha Portland. “Miskiiniimadiisa, kaftankiisa, iyo isaga oo qof akhlaaq fiican ayaa u sahashay in saaxibadiisa shaqo ay wax ka bartaan, iyo isaga oo saameyn cajiib ah ku dhex lahaa kooxdiiisa.”

Barnaamijka Macalinka Sanadka ee Oregon waxaa kafaala qaad Waaxda Waxbarashada Oregon oo iskaashi la leh Bakhtiyaanasiibka Oregon. Ka bacdi marka la sameynayo doorashada Macalinka Sanadka oo mara nidaam codsi oo baaxad leh ayaa lagu doortaa codsabayaasha marka la qiimeeyo hoggaamintooda, khibradooda waxbarista, sida ay uga qeyb yihiin bulshada, fahamkooda arrimaha taagan ee waxbarashada, horumarimta xirfadooda, iyo argatidooda fog.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Macallin Matthew Bacon-Berens iyo barnaamijka Macalinka Sanadka ee Oregon waxaad booqataa: <http://www.oregon.gov/ode/about-us/Pages/2017NewsReleases.aspx>.